**Sharciga lamba. 10 ee 30 Sebtember 1956**

**Ballaarinta howlaha Amaahda Somalida**

**MAAMULAHA GUUD**

Kadib marki la arkay qoraalka ay Golaha Sharci Dejintu ku ansixisay.

**WAXAA LA ANSIXIYAY WAXAANA LA AMRAY**

**Qod. 1**
**Dhismaha iyo Saldhiga**

Hey'adda Amaahda Somaliya waa hey'ad qeynuuni ah.

Ilaa intii laga soo saari doono sharciga la xiriira badbaadada keydka iyo howlaha amaahda, waxay hoos tegi doonta Wasaarada Arrimaha Dhaqaalaha.

Hey'addu waxaa noqon doonta muddo hal sano gudaheeda maalinta sharcigaan lagu daabaco doono shirkad saamiley ah oo maamulka sharcigaas hoos geli doonaa.

Hey'addu saldhigedu dhexe waa Muqdishu waxayna waaxyo ku suubsan karta Somaliya gudaheeda iyo dibedda.

Waxaa la hoos geeyey Ra'isul Wasaaraha Xafiiska Guddonka Golaha.

**Qod. 2**
**Ahmiyadda iyo Howlaha**

Ahmiyadda Hey'addu waa horuarinta dhaqaale ee dalka sidas awgeed waa loo fidin doona amaahda dhinaca beeraha, xoolaha, kallunka, warshadaha, dhismaha, farshaxanka iyo ganacsiga.

Amaahda ay Hey'addu bixineysa waxay khuseysa bilaabida iyo fulinta howlahaasi.

Sidaas awgeed Hey'addu waxay fulin karta sida ku carifan qodobka 12 oo tilmaamayo xadka iyo damaanadaha , wax allaliyo wixii howl bangi ah ee toos ama dadban, fulinta howlaha gaarka , dhisida waaxyo madax banana oo maamul iyo misaaniyad gaar ah leh ee la xiriira warshadaha, dhismaha iyo dhinacyada kale ee amaahda. Dhismaha waxyada gaarka ah, kadib markii la dhegeysto aragtida toosan ee Maamulka iyo soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Dhaqaalah, iyadoo la dhegeysta talada Golaha Wasiirada.

Howlaha dadban ee keydka iyo dhigaalka iyo xisabaadka socoto ama bixinta jeegaga wareega waxaa loo dhigi doonaa lacag dammaanad ah oo u dhiganta 20% hantida hey'adda. Lacagta keydka ah, oo 3 bille ah waxaa hanti Dowli ah ama lacag ku jirto xisabaad socoto oo ku qoran AFIS ee laga furi doono hey'ad kale ee bangi iyo halka loogu tala galay.

**Qod. 3**
**Xubinta Kormeerka**

Ilaa iyo intii la soo saari doono sharci la xiriira difaaca keydka iyo fulinta amaahda ee Wasiirka Arrimaha Maaliyada waxaa la dhisayaa Guddi Kormeer oo loo xil saaray shaqada kormeerka hey'sadda si loo hirgeliyo nidaamka hey'adda iyo dowladda.

Guddigu wuxuu ka kooban yahay Rai'sul Wasaaraha oo guddomin doona , wasiirka Arrimaha Gudaha, Wasiirka Maaliyah, midka Arrimaha Gudaha iyo 3

khabiir oo laga soo soocan doono sarakiisha AFIS oo lagu magacaabi doono dekreeto Maamulaa iyadoo lala tashtay Wasiirka Maaliyada iyo Golaha Wasiiradda.

Guddigu wuxuu leeyahay awood ballaraan ee kormeer ee howlaha amaahinta guud ahaan, iyo howlaha so uruurinta iyo falcelinta keyda.

Howlaha joogtada ah ee Guddiga Kormeerka waxaa lagu tilmaami doona sharciga.

Wakiil Guddiga Kormeerka ayaa ka qeyb qaadan doono shirarka Guddiga Maamulka, kaas oo siin doono haddi loo baahdo talooyin ku saleeysan nidaamka hey'adda iyo kan dowli ah si loo helo wax is bedel ah. Haddii taasi ay surtoobi weyso, wakiilku wuxuu codsan kara in la hakiyo go'aankaasi isago wargelin buuxda siin doono Guddiga Kormeerka, kaas oo u gudbin doono Guddonka Hey'adda ilaa iyo muddo 10 beri ah maalintii ay heleen warbixintaasi.

Soo jeedinta wakiilka Guddiga Kormeerka waa in lagu qoro warxinta fadhiyada.

Nuqul warbixinta ee shir kasta ee Guddonka waxaa in loo gudbiyaa Guddiga Kormeerka muddo 3 beri gudahooda maalintii uu shirka dhacay.

## Qod. 4
## Hantida iyo Rasumaal Wadaag

Hantida hey'addu waxay ka kooban tahay:

a) hantida saldiga u ah ee ay AFIS bixisay oo dhan So. 3.200.00;
b) Hantida dheeradka ah ee AFIS ay bixisay ee So.1.500.00;
c) Meeleynta si rasmi ah iyo horumarinta saafiga ah ee maamulida AFIS oo dhan So. 1.000.00;
d) Tabarucaad dheerad ah ee AFIS iyo Dowladda;
e) Deeqda iyo wax allaliyo wixii tabaruc oo meel kale ka yimaado;
f) Lacagaha dheeraad ah ah ee sanad walba oo ay Dowladdu sar goyso.

Markii hey'addu loo beddeli doono Shirkad Saamiley ah, hantidaasi waxaa sida ku cad qod. 2343 ee Xeerka Madaniga ee dhsmaha shirkadaha Saamileyda kuwaas oo heli doono hantida saldhi u noqon doonta.

Rasumaal wadaagga Shirkadda "Amaahda Somaliya' waxaa lagu qiimeyn doona saami qiiyaastiisu yahay So. 100 midkiiba. Samiyadaasi waxaa yeelan doono:

1) Dowladda Somalida ama hey'ad dowli ah oo la carifay oo aan ka yareyn 51% rasumaal wadaagga;
2) Hey'adaha leh soo uruurinta keydka iyo amaahda;
3) Hey'adaha caymiska;
4) Dad shaqsi ah.

Rasumaal wadaagga ee lagu biaabi doono waxaa iska Dowladda Somaliyeed. Rasumaalka dheeraadka ah ee ku xiga waxaa loo hibeyn karan cidda ku tixan faqradaha 2, 3 iyo 4 iyadoo la dhowri doono shuruudda ah in rasulmaalka wadaggu ay lahaato 51% Dowladda Somaliyeed.

## Qod. 5
## Biilasha iyo Amaahda

Hey'addu si ay u fuliso howlaheeda iyo ku gaarka ah ee maalgelinta waaweyn ee lagu hormarinaayo dhaqaalaha iyo bulshada dalka, waxaa loo ogol yahay in ay waariddo biilasha magac wata ama deyn ka qaadato mid gudaha iyo dibedda ah ee bangiyada ama hey'adaha kale ee maalgashiga ah.

Howlahaasi waxaa lagu amri doona amar ka soo baxo Maamulaha iyado tashiga suuban ee Guddiga Kormeerka iyo Wasiirka Arrimaha Dhaqaalah iyo Golaha Wasiirada.

**Qod. 6**
**Xubnaha Hey'adda**

Hey'addu waxay ka kooban tahay:

a) Golaha Maamulka;
b) Guddiga Fulinta;
c) Guddonka Duqyada magaalooyinka;
d) Agaasimaha.

**Qod. 7**
**Golaha Maamulka**

Golaha Maamulku wuxuu ka kooban yahay 7 xubin, waxaa lagu magacaabi doona dekreeto Maamulaha kadib markii lala tashtay Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha, Golaha Wasiiradaha, xubno laga soo soocay qeybaha teknika iyo dhaqaalaha:

| | |
|---|---|
| — Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha | 3 |
| — Wasaaradda Maaliyada | 2 |
| — Wasaaradda Arrimaha Gudaha | 1 |
| — Rugta Ganacsiga, Warshadaha, Beeraha | 1 |

Guddomiyaha Golaha Maamulku waxaa ka soo sooci doono xubnahaasi Maamulaha waxaana lagu magacaabi doonaa dekreetadiisa

Guddomiyaha iyo Golaha Maamulki waxaay hayn doonan xilkaasi ilaa iyo Shirka Guud ee Saamileyda kadib markii ay isku beddesho Shirkad Saamiley ah.

Qaabka iyo howlaha Golaha waxaa lagu caddeyn doonaa sharci u gaar ah.

**Qod. 8**
**Gudda Fulinta**

Guddiga Fulinta wuxuu fulin doonaa howlaha maamulka ee Hey'adda iyo waaxyadeeda gaarka ilaa iyo xad uu sharci u oggol yahay. Guddigu wuxuu ka kooban yahay Guddomiye iyo laba La-Taliyeyaal oo laga soo dhex saaro Golaha Maamulka.

**Qod. 9**
**Acaabay**

Agaasimaha waxaa lagu magaacbi doonaa dekreetada Maamulaha isagoo la tasht**ay** Golaha Maaulka. Howlaha Agaasimaha waxaa ka mid ah in uu fuliyo go'aanadda hey'adda sida ku qoran sharciga.

**Qod. 10**
**Guddonla Duqyada Magaalooyinka**

Guddonka duqyada magaaloyinka wuxuu ka kooban yahay Xisaabiyaha Guud ama ciddii uu soo wakiisho, oo guddomin doono iyo laba xubin iyo laba shaqsi oo bedeli doono, kuwaas oo lagu soo magacaabay dekreeto Maamulaha isagoo la tashay Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha iyo Golaha Wasiirada, Guddonku wuxuu xilka hayn doona ilaa iyo Kalfadhigga 1aad ee saamileyda sida ku qoran qod. 7.

**Qod. 11**
**Misaaniyada ada iyo Ntiijoyinka Dhaqaale**

Sanad howlgalka hey'adda waxay bilaabaneysa 1da Janaayo waxayna ku eg tahay 31 Disember.

Qaabka iyo shuruudaha howlgalka misaaniyadda waxaa lagu caddeyey sharciga.

Wixii khasaaro iyo kharaj ah oo sanad misaaniyada dhexdeeda laga helo waxaa loo qeybin doonaa sida ku cad sharciga.

**Qod. 12**
**Amaradda Guud**

Hey'addu waxay howlaheeda deynka fulin doontaa kadib markii ay hesho dammaanad sida lagu caddeyey sharciga. Muddada deyminta ka badnaan karto 5 sano, lacagta la amaahin doonaan kama badnaan doono 5 u dhigga hantida hey'adda.

Howlaha amaahda oo muhimad weyn u leh horumarinta dalka oo qasbaaya muddo ka dheer ama amah aad u weyn waxaa loo baahan yahay fassaxa gaarka ee Maamulaha, kadib markii uu la tashatay Golaha Kormeerka, iyo Wasiirka Arrimaha Dhaqaalah iyo Golaha Wasiiradaha.

Amaahda loo ogoolado hey'adaha beeraha iyadoo la dhowraayo shuruudaha loo baahan yahay sida heshiisyada, qoralaha la xiriira howlaha laftigooda, lama canshuuri karo ama lagama qaadi karo ujuuro dowladeed.

Amaahda loo oggolado dhismaha doomaha sida 'sambuchi' "beden" iyo "uri" ama doomaha kallunka ama qalab dabidda waxaa damaanad la dul saari doonaa

Haddii ay dhuwaan, amaahdo waxay sarnaan doonta caymiiska.
Dammaanadasi waxaa ku jira kharajka gaarsooka oo ka hor mari doona dammaanadaha kale;

Dammanadaha beeraleyda waxaa ku waajiba canshuurta la eg So. 0/!0 100 Somali, muddo kasto ha noqoto muddadooda.

**Qod. 13**
**Kala Diridda iyo Magdhawga**

Wuxuu Maamuluhu leeyahay awoodda kala dirista iyo bixinta magdhawga ee hey'adda kadib markii uu la tashtay Golaha Kormeerka, Wasiiradda Arrimaha Dhaqaalaha iyo Golaha Wasiirada, taas oo lagu fulin doono kadib markii la magacaabo guddomiye kala dira oo lagu magacaabi doono isla sharcigaan kadib markii:

— Markii la caddeyo in ay jiraan qalad fara badan o oculus, ku xad gudub sharciga iyo nidaamyada la xiriira hey'adda;
— Markii la caddeyo in hanti badan ay dhunta oo gaarsiisan hantida saldhigga ah oo gaarayo kala bar hantida guud ee hey'adda;
— Markii ay caddato in hey'addo ay ka gaabisay ahmiyada loo as aasay.

Kadib markii uu la tashto Wasiirka Arrimaha Dhaqaalah iyo Golaha Wasiiradaha, wuxuu Maamuluhu kala diri doona hey'adda isagoo ku wareejin doono hantida saafiga ah danta guud iyo ku xawil doono meelihi loogu talal. Kadib markii hey'ad loo beddelo Shirkad Saamiley, waxaa halkaan lagu qoray waxaa awoodeed yeelan doono Kalfadhigga Guud ee saamileyda.

**Qod. 14**
**Dhamaad Xilka olaha Maamulka**

Xubnaha Golaha Maamulkau, markii laga reebo Guddomiyaha iyo xubnaha Guddonka Duqyada magaalooyinka oo lagu magacaabay amar-shaciga lamba. 3 ee 22 Febarayo 1954 waxaa ka dhamaanaya xilkooda kadib markii sharcigaan uu hirgalo.

**Qod. 15**
**Amaradda Gunnaanadka ah**

Amar-sharciga lamba. 3 ee 22 Febarayo 1954 waa la buriyey Sharcigaan wuxuu hirgeli doona maalinta lagu soo daabaco Faafinta rasmiga.

Sharciga waxaa lagu keydin doona Keydka Rasmiga ah ee Shuruucda waxaana lagu soo daabaci doona Faafinta Rasmiga ah. Waxaa la faraayo in cid kasto ay ku hoggansanaato sharcigaan, cid kasto loo hoggamiyo ee ku nool Somaliya.

Muqdisho, 30 Sebtember 1956.

**Anzilotti**

**Haji Farah Ali Omar** **Abdullahi Issa Mohamud**